SWEDISH MEDICAL CENTER

OGAYSIISKA HABDHAQANKA WARKA KU SAABSAN CAAFIMAADKA

OGAYSIISKANI WUXUU SHARAXAYAA SIDA WARKAAGA LOO ISTIMAALI KARO LOONA SHEEGI KARO QOFKALE IYO SIDA AAD KU HELI KARTO WARKAA. FADLAN ADIGA OO KA FIIRSANAYA DIB U EEG.

Swedish (ama "Swedish" ama "Anaga")wuxuu sharcigu na farayaa inaan ilaalino warka ku saabsan caafimaadkaaga,iyo inaan ku ogeysiinu waxaad xaq u leedahay,iyo habdhaqanka sir ahaanshaha warka.
Ogaysiiskani wuxuu sharxayaa sida macluumaadkaaga caafimaadka loo isticmaali karo iyo/ama loo shaacin karo, waxaanad xaq u leedahay inaad codsato ood hesho koobi kamida ogaysiiskan. Iswidhishku isticmaali maayaan ama shaacin maayan macluumaadkaaga caafimaad marka laga reebo sida ogaysiiskani sheegayo.

Ogaysiiskani wuxuu ku saabsanyahay macluumaadka caafimaadka oo dhan ee ay soo saaraan aqoonyahanada daryeelka caafimaadka, shaqaalaha, shaqaalaha kontaraaga ku shaqeeya, ardayda iyo kuwa xooghurka ku shaqeeya,qeybaha Iswidhishka,ooy kamid yihiin:

- Xarunta Hosbitaalka Swedish Qeybaheeda
- Xarumaha Daryeelka Bukaan-socodka Iswidhishka
- Kooxda Caafimaadka Iswidhishka
- Adeegyada Neerasda bookhashada ku timaad.
- hayadaha Iswidhishka
- Rugaha Caafimaadka Iswidhiska

Ogaysiiskani wuxuu ku saabsanyahay bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ee kale ee la wadaaga diiwaanka elektarooniga caafimaadka Iswidhishka. Kuwaas oo ogolaaday inay raacaan habdhaqanka macluumaadka caafimaadka. Liiska dhamayska ah ee hay'adaha Iswidhishka ah iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ee kale ee la wadaaga nidaamka diiwaanka elektarooniga caafimaadka Iswidhishka waxa laga heli karaa websaaydka Iswidhishka www.Swedish.org.

Ogaysiiskan wuxuu ku saabsanyahay warka iyo qoraalka la xidhiidha caafimaadkaaga ee ay isticmaalaan meela dadka lagu daweeyo iyo qeybaha kale ee soo raaca.
Sida ay tahay, diiwaankan waxa ku jira astaamahaaga, natiijooyinka baadhitaanadaada, ogaanshiyaha cudurka, daawaynta, iyo qorshe daryeel ama daawayn mustaqbal. Qoraalka yaala cusbitaalada, waaxaha gurmadka, iyo waaxaha baadhista ogaanshaha sida sawirka akas ray iyo rugaha bukaan-socodku waa tusaaleyaal. Markaan bixino qaban qaabo daryeel caafimaad oo wada jira oo ka dhexeeya hay'adaha waxaynu u wadaagi macluumaadkaaga caafimaad sida looga maarmi waayo si loo guto daawayn, lacag bixin iyo hawl socodsiin.

Ogaysiiskan waxa isticmaalaya nidaamka diiwaanka elektarooniga caafimaadka Iswidhishka. Qoraalka elektarooniga caafimaadka waxa loo heli karaa elektaroonik ahaan ujeedooyin caafimaad dartood. Tusaaleyaasha qaar waa:

- Qofka buka ama ka u wakiilka ah, ee la oggolaaday iyadoo la sii maraya nidaam elektarooni ammaan ah oo la dhaho MyChart ama
- bixiye ama xirfadle kale oo daryeel caafimaad oo la leh xidhiidh daawayn qofka buka iyadoo la sii marayo nidaamka warhelista fog oo ammaana shaacin kale oo ammaan ah ama habka war isdhaafsiga.

Isticmaalidda Wararka Caafimaadka ku Saabsan.

Wakhti kasta ood booqato cusbitaal, dhakhtar, ama bixiye daryeel caafimaad oo kasta, qoraal booqashadaada ah ayaa la sameeyaa. Qoraalkaa, oo inta badan la gudbinayo isagoo ah qoraalkaaga caafimaadka, wuxuu u shaqeeyaa:

- aasaaska qorshaynta daryeelkaaga iyo daawayntaada
- qaab isgaadhsiin oo ka dhexeeya xirfadleyaal caafimaad oo badan kuwaasoo gacan ka gaysta daryeekaaga
- qoraallo sharci ah oo sharxaya daryeelka aad heshay
- qaab adiga ama bixiyaha meel saddexaad uu u caddayn karo in adeegyada lacagtooda la sheeganayo xaqiiqdii la qabtay.
- Qalab loo isticmallo waxbarista kuwa daryeelka caafimaadka ama meela kale ka shaqeeya.
- Meel laga hello warka cilmi-biidhista caafimaadka
- Aqoonyahanada caafimaadka dadweynuhu meel ay ka ogaadaan warka oo loo wanaajiyo caafimaadka wadanka
- Meel laga heli-karo warka qoyrsheynta iyo iibgeynta.
- qalab aynu ku qiimayn karno si joogto ahna ugu shaqayn karno si aan u horumarino daryeelka aanu bixino iyo natiijooyinka aan ku guuleysano.

Fahmidda waxa ku jira diiwaanka iyo sida macluumaadkaaga caafimaadka loo isticmaalaa waxay kaa caawin si aad:

- u hubsato saxsanaanteeda
- si fiican ugu fahamto cidda, waxa, goorta, sababta iyo sida kuwa kale u heli karaan macluumaadkaaga caafimaad.
- Aad gaadho go'aan cilmi-ku dhisan markaan warka bixino.

Tusaaleyaal Shaacinta Daawayn, Lacag Bixin iyo Hawlo Caafimaad

Qaybahan soo socdaa waxay sharxayaan siyaabaha aanu u isticmaali karno una shaacin karno macluumaadka caafimaadkaaga.

Daawaynta. Waxaanu u isticmaali doonaa macluumaadka caafimaadkaaga si aan kuu siino adeegyo daryeel caafimaad. Tusaale, kalkaalisooyinka, dhakhtarada, ama xubnaha kooxdaada daryeelka caafimaadku waxay diiwaangashan doonaan macluumaadka diiwaankaaga una isticmaali doonaan: si ay u go'aansadaan daawaynta, baadhitaanada iyo dabiibista; si ay u fuliyaan daawayn; una fahmaan oo qiimeeyaan jawaabcelintaada daawaynta. Sidoo kale waxaa dhici karta inaad tusno macluumaadkaaga caafimaad dadka ku lug yeelan kara dayeelkaaga caafimaad markaad ka tagto Iswidhish, sida xubnaha qoyska iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaad.

Lacag bixinta. Waxaanu u isticmaali macluumaadkaaga caafimaadka lacag bixinta. Tusaale, qaansheeg ayaa loo diri karaa adiga ama bixiye gacan saddexaaad. Macluumaadka ama qaansheegta waxa ku qoran waxa ku jiri kara macluumaad ku tilmaamaya, ogaanshahaaga caafimaad, taariikhaha adeegyada, hababka iyo qalabka la isticmaalay.

Hawlaha Daryeelka Caafimaad ee Soo Noqnoqda. Waxaan isticmaali doonaa macluumaadkaaga daryeelka caafimaadka si aan u fulino hawlo daryeel caafimaad. Tusaale, xubnaha shaqaalaha caafimaadka, ama kooxda horumarinta tayadu, waxay isticmaali karaan macluumaad ku jira

diiwaankaaga caafimaadka si ay u qiimeeyaan daryeelka iyo maxsuulka kiiskaaga iyo kuwa kale ee la mida. Tani waxay caawinaysaa inaan qiimayno gudashada shaqaalahayaga markay ku daryeelayaan.

Isticmaalada iyo Shaacinaha Kale

Sidoo kale waxaan u isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaakaaga caafimaadka shakhsi oggolaanshahaaga la'aantii si aan u buuxino baahiyo tabineed oo gaara, si aan u fududayno sii socoshada daryeelka, ama caafimaadka dadwaynaha dartii ama ujeedooyin kale. Isticmaaladan ama shaacinahan waxa kamida:

- Qoyska, lamaanaha iyo saxiibada ku lugta leh daryeelkaaga caafimaad.
- Kuwa wada shaqaynta ka dhaxayso ururkayaga, kuwaasoo aanu kula heshiino adeegyada. Tusaaleyaal iskaashi ganacisyeedka waxa kamida la taliyeyaasha, xiisaabiyeyaasha, qareenada, qoreyaasha caafimaad iyo gacanta saddexaad oo ah shirkadaha qaansheegta. Waxaan uga baahanahay iskaashi ganacsiyeedkan inay ilaaliyaan qarsoonaanta macluumaadka caafimaadka
- Maamulka Cuntada iyo Daawada, sida inay tabiyaan dhacdoonka gurracan
- Macluumaadka hawlaha kormeerista caafimaadka, sida hubinta ama liisan siinta
- Warbixinaha cudurada faafa
- Warbixinaha loo shaaqeeyaha ee xanuun ama dhaawac la xidhiidha shaqada
- Warbixino ku saabsan gaboodfal, dayac ama xadgudub guriga ah
- Si looga horgtago halis caafimaad ama badbaado ama in laga hortago waxyeelo halisa oo qof ku dhacaysa
- Masiibo ka saaris: waxaan tusi karnaa meeshaad joogto iyo xaaladda guud meelo guud ama mid gaar (sida FEMA ama Laanqayrta Cas) oo uu oggolaaday sharci si ay u xoojiso dadaalada samatobixinta
- Sida sharcigu dhigayo, sida u hogaansanaanta sharciga ama iyadoo laga jawaabayo u yeedhis maxkamadeed ama amar maxkamadeed
- Macluumaadka diiwaanka cusbitaalka, oo ku eg magacaaga iyo xaaladdaada guud ee caafimaad (sida, "khatara," "liita," "dhexdhexaada," "wanaagsan," ama weedho shabbaha), ilaa aad na ogaysiiso in aad jeceshahay in lagaa saaro diiwaanka
- Dabagalayaasha iyo baadheyaasha caafimaad markay lama huraan u tahay hawl gudashadooda
- Ururada kasbashada xubin, ilaa xadka uu oggolaaday sharcigu
- Cilmi-baadhis uu oggolaaday Guddiga Dib-u-eegista Ururee d. Halka daraasaadka cilmi-baadhista rugeed badankeeda loo baahan yahay oggolaansho cayiman ee bukaanka, waxa jira meelo kale halkaasoo dib-u-eegista diiwaan, nud ama tusaale cilmi-baadheyaashu isticmaali karaan oggolaansha bukaanka la'aantii
- Shaqooyinka dawladda ee gaarka ah, tusaale, sida uu farayaan maamuladu milatarigu
- Magdhawga shaqaalaha
- Qaadhaan: waxaanu kuula soo xidhiidhi karnaa anagoo kaqayba dadaado qaadhaan ururin.
- Suuq-gaynta: Waxaanu ku siin karnaa macluumaad kusaabsan daawayno kale ama adeegyo kale oo caafimaadka la xidhiidha kuwaasoo ku xiiso galin kara
- Xasuusiyeyaasha ballamaha
- Haddaad tahay buktaan cusbitaal jooga, macluumaadkaaga caafimaad waxa loo fasixi karaa urur ama hay'ad toosineed

Isticmaalada iyo shaacinaha kale waxa lagu samayn doonaa oggolaanshahaaga qoran, taasoo aad xaq u leedahay kiisaska badankooda inaad ka laabato.

Ansixinaha Gaarka ah

Shuruucda dawladda dhexe iyo goboleed ee siiya ilaalin gaara noocyo cayiman oo macluumaadka caafimaadka shakhsikha ah (sida macluumaadka kusaabsan cudurada galmada la isku qaadsiiyo iyo kuwa kale ee la kala qaadaba, daawaynta ku-talaxtagga daawada iyo khamriga, adeegyada daawaynta caafimaadka maskaxda qaar) waxay kuu soo wici oggolaansho gaara si ay u shaaciyaan macluumaadka. Marka macluumaadkaaga caafimaadka shakhsi hoos uga dhaco ilaalinahan gaarka ah, waxaanu xafidi doonaa oggolaanshaha loo baahan yahay si ay raacaan shuruucdan.

Xuquuqahaaga

Waxaad leedahay xuquuq shakhsiyeed isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka shakhsiyeed, xuquuqdaa wax kamida hoos ayaa lagu qoray. Waxaad adeegsan kartaa wax kastoo kamida xuquuqadan adoo la xidhiidhaya waaxdayada Maamulka Macluumaadka Caafimaadka (425) 640-4200.

Xaddid isticmaalka: Waxaad ku codsan kartaa qoraal inaananu u isticmaalin ama shaacin macluumaadkaaga daawayn, lacab bixin iyo ujeedooyin maamul marka laga reebo marka aad aduu oggolaato, marka sharci faro, ama xaalado gurmad ah. Waanu tixraaci doonaa codsigaaga laakiin sharci ahaan khasab ma aha inaad aqbasho.

Xaddid lacag iska bixiye: Waxaad qoraal ku codsan kartaa inaananu tusin macluumaadkaaga caafimaadka shakhsiyeed qorsheyaal caafimaad ee adeegyo ama ashyaa ah lacag iska bixiye. Waxa jira xaalado cayiman oo ay tahay in la buuxiyo si aanu u raacno codsigaaga.

Hel wada xidhiidho qarsoon: Waxaad xaq u leedahay inaad hesho wada xidhiidhka qarsoon ee siyaabo ama meelo kale. Tan waxa ku jira ciwaan fariin diris oo kale ama ciwaan iimayl.

Baadh oo koobi ka qaado: Kiisaska badankooda, waxaad xaq u leedahay inaad qoraal ku codsato helista ama naqilidda macluumaadkaaga caafimaad.

Codso sixitaan: Waxaad xaq u leedahay inaad qoraal ku codsato inaanu saxno macluumaad ku jira diiwaankaaga ood rumaysan tahay inuu khalad yahay ama u gayso macluumaad aad rumaysan tahay inuu maqan yahay.

Wax ka baro shaacinta: Waxaad xaq u leedahay inaad ku codsato qoraal ood hesho liiska marar aanu u shaacinay macluumaad sababo aan ahayn daawayn, lacag bixin ama ujeedooyin maamulka la xidhiidha.

Cabashooyin: Haddaad tabanayso inaanu ku-xadgudubnay sirtaada, ama aanad ku qanacsanayn go'aanka aanu ka qaadanay helista diiwaankaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa Xafiiskayaga Xidhiidhada Bukaanka (206) 386-2111 ama Xafiiska Sirta (206) 386-6178.

Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Xoghaya Caafimaadka iyo Adeegyada Binu Aadamka – Sarkaalka Xuquuqda Shacabka haddaad dareento in xuquuqdaadii sirta lagu xadgudbay. Iswidhisku kaaga aargoosan maayaan buuxintaada cabasho kasta.

Waxa na faraya sharci inaan ilaalino sir ahaanshaha macluumaadkaaga caafimaadka, si aan u siino ogaysiiskan kusaabsan hirgalinta warka caafimaadka iyo inaan raacno hirgalinta sir ahaanshaha kuwaasoo lagu sharxay ogaysiiskan.

Isbedelada Ogaysiiskan lagu sameeyey

Ogaysiiskan wuxuu shaqaynayaa Abriil 14keeda, 2003. Waanu leenahay xaqa bedelaada shuruudaha ogaysiiskan iyo inaanu ka dhigno waxyaabaha ku jira ogaysiiska cusub mid waxtar u leh macluumaadka caafimaadka shakhsiyeed eenu joogtayno oo dhan. Ogaysiiska dib-loo-eegay waxa lagu soo dhejin doonaa meelaha adeegayaga iyo websaaydkayaga www.swedish.org. Waad codsan kartaa nuqul ogaysiiska cusuba xilli kasta adoo waca (206) 386-2502.
Rev. 03-25-2011